


# Doorashada dugsiga inta ka horreeysa dugsiga barbaarinta

Fasalka ka horreeya dugsiga  waa tallaabada ugu horreysa ee dugsiga hoose dhexe. Ujeedada hawsl qabadkan waa in lagu hago cunug walba sii wadida waxbarashadiisa iyo horumarkiisa. Fasalka ka horreeya dugsigu waa ku qasab dhammaan carruurta ku nool Iswiidhan laga bilaabo xilliga deyrta ee sannadka ay lix jirsanayaan. Shaqada fasalka ka horreeya dugsigu waxa ay ku dhacdaa xiriir dhow oo lala yeesho dugsiga sannad fasaladkiisa ee kale iyo xarumaha waqtiyada firaaqada.

Fasalka dugsiga hortiisa ah waxaa ku guda jira ugu yaraan 20 saacadood toddobaadkii. Dugsi kastaa isaga yaa go'aamiya sida ay waqtiga ugu kala qaybinayaan maalmaha.

Ku socota adigaagan qaba su’aalaha ku saabsan hawl qabadka dugsiyada duwan ama doona inuu boos uga helo isaga cunugiisa dugsiyada duwan. La soo xiriir maamulaha xagga dugsiyada duwan anette.ekskog@falun.se

Inta lagu guda jiro aafada hadda jirta ee caabuqa, dugsigu ma ay heystaan fursad ay idiinkuugu yeeraan idinka ah qofka mas'uulka ah ilmaha ama waalidiinta shirarka macluumaadka la idinku siin lahaa, ee sida caadiga ah inta badan dhaca ka hor doorashada dugsiga iyo bilowga fasalka dugsiga ka horreeya. Dugsigu waxa ay yeelanayaan macluumaad cad oo ku soo baxaya falun.se, si loo sharraxo wax qabadyada hadba sida ugu macquulsan ee ugu hagaagsan. Haddii aad wax su'aalo ama is waydiino ah qabtid, waa lagugu soo dhaweynayaa in aad la soo xiriirto maamulayaasha iyo maamule ku xigeennada.

## Codsiga

Haddii aad adigu boos ka rabto dugsiyada degmada, waxa aad ku buuxineysaa xulashada midda koowaad, midda labaad iyo midda saddexaad ee ku lifaaqan foomka "Kala doorashada dugsiga iyo codsiga meelaynta dugsiga". Foomka waa in loo soo diraa degmada Falu, Maamulka Carruurta iyo Waxbarashada, Barn- och utbild- ningsförvaltningen, 791 83 Falun, waa inay soo gaadhaa ugu dambeyn 15 diseembar. Adigaagan ka dalbaday, laakiin aanan boos ka helin dugsiyada madaxa bannaan, oo aan ka codsan wax dugsi degmo ah, waxaa lagugu meelayn doonaa dugsiga iyada oo la raacayo jadwalkayaga caadiga ah iyo nidaamka mudnaanta ee meelaynta dugsiga.

*Jaan goynta iyo kala mudnaansha si loo maareeyo meelaynta dugsiga markii la gaaro awoodda ugu badan:*

1. Ardayda ka tirsan dugsiga meelaynta
2. Ardayda ah kuwa ka diiwaangashan degmada Falu
3. Elever som är folkbokförda i Falu kommun
4. Ardayda kale

Haddii ay jiraan xaalado loo siman yahay eex iriirka u dhexeeya ardayda, waxaa la go'aamin doona qori tuur.

## Ogaysiinta ku saabsan meelaynta dugsiga

Marka ay taariikhdu tahay 1da Febraayo ugu dambeyn, waxaa lagugu soo ogeysiin doonaa meeleynta dugsiga iyada oo lagu soo diraayo warqad cinwaanka diiwaangelinta dadweynaha ee ilmaha.

## Codsi ku saasan booska aqalka waqtiyada firaaqada

Adigu ma leedahay baahi ah in laguu sii daryeelo ilamaha ka hor dugsiga ama kadib, waxaa jira aqalka waqtiyada firaaqada oo lacag ah. Aqalka waqtiyada firaaqada waxa uu furanyahay laga soo billaabo 2 da busha agoosto. Adigu waa in aad codsataa booska aqalka waqtiyada firaaqada, adigoo ka codsanaayaa bogga internetka ee degmada falun.se. marka aad hesho warka ku saabsan meeleeynta dugsiga. Taasina ma jiraan wax saf ah oo ku saabsan aqalka waqtiyada firaaqada

Haddii aad adigu u baahan tahay sii daryeel carruurta ka hor iyo  ama ka dib maalinta dugsiga, waxaa jira aqalka waqtiyada firaaqada oo lacag ah. Aqalka waqtiyada firaaqada waxa ay furan yihiin laga soo billaabo 2 da Agoosto. Adigu waxa aad boos ka dalbaneysaa aqalka waqtiyada firaaqada adiga oo adeegsanaya bogga

degmada falun.se markii lagu wargeliyo meeleynta dugsiga. Ma jiraan wax saf ah oo loogu tala galay aqalka waqtiyada firaaqada.

## Codsiga ku saabsan kaarka baska / baska dugsiga

Carruurta dhigata fasalka dugsiga hortiisa ah waxa ay xaq u leeyiiniin gaadiidka dugsiga ama kaarka baska, waase haddii ay fogaanta u dhaxeeysa dugsiga iyo aqalka cinwaanka ee lagu qoranyahay ay tahay 2 km ama ka badan. Haddiise aad adigu doorato dugsi kale oo aan ka ahayn kan aad ka tirsantahay, ma ahan wax la hubo in aad xaq u yeelanaysid gaadiidka dugsiga, haddii ayxitaa  fogaanta gurigu tahay mid intaas ka fog

Carruurta dhigata fasalka dugsiga ka horreeya waxa ay xaq u leeyihiin kaarka baska / baska dugsiga haddii masaafada u dhexeysa cinwaanka diiwaangelinta dadweynaha iyo dugsiga meelaynta ay tahay laba km ama ka badan. Haddii aad doorato dugsi aan ahayn kan aad ka tirsan tahay, lama hubo in aad xaq u leedahay gaadiidka dugsiga xitaa haddii masaafada guriga ay ka dheer tahay.

Adigu waxa aad ka codsaneysaa kaarka baska / baska dugsiga bogga degmada falun.se inta u dhexeysa Maarso 22 - Abriil 9.

**Si diirran ugu soo dhowoow dhanka dugsiyada hoose dhexe ee Falu!**

Gustaf Malmberg
*Madaxa dugsiyada ee dugsiga hoose dhexe iyo dugsiyada duwan ee hoose dhexe .*

Degmada Falu

- Maamulka carruurta
  iyo wax barashada
  023-830 00

FALUN